



Liiska Manhajyada La Waafajiyey

Liiskan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo hagitaan iyo macluumaad ka caawinaya xirfadlayaasha barbaarinta carruurta ee hore xulashada manhajyo tayo sare leh oo caddayn cilmiyeed leh, kuwaas oo ka tarjumaya xoogga iyo baahiyaha carruurta, qoysaska, macallimiinta, iyo bulshooyinka ka qaybgalaya barnaamijka Early Achievers.

Ku Saabsan Liiska Manhajyada La Waafajiyey

Jaamacadda Washington ayaa daabacday Warbixinta Macluumaadka Manhajka (Curriculum Consumer Report) si loo aqoonsado manhajyo ku salaysan caddayn oo la jaanqaadaya Hagayaasha Horumarinta iyo Barashada Carruurta ee Gobolka Washington. Warbixintaas ayaa loo adeegsaday in lagu abuuro liis manhajyo buuxiya heerka waafaqsanaanta manhajka ee barnaamijka Early Achievers

Sida Loo Adeegsado Liiskan

Mid kasta oo ka mid ah manhajyada ku taxan halkan waxaa loo tixgeliya “dhameystiran” sababtoo ah waxay ka kooban yihiin yoolal waxbarasho iyo hawlo ku saabsan qaybo kala duwan oo horumarinta ah, oo ay ku jiraan akhris-qoraalka, xisaabta, iyo horumarinta bulsho/shucuureed. Liiska manhajyada waxaa loo kala saarayaa iyadoo lagu saleynayo kooxaha da’da. Markaad dooranayso manhaj, hubi inaad doorato kan ku habboon kooxda da’da aad la shaqaynayso. Haddii aad la shaqayso kooxo da’ kala duwan leh, waa inaad isticmaashaa manhaj la waafajiyey ama aad buuxisaa Qalabka Waafajinta Manhajka (Curricular Alignment Tool - CAT) ee koox kasta oo da’ ah.

Tusaale: Haddii aad u adeegto carruur da’doodu u dhaxayso dhalashada ilaa shan jir balse aad isticmaasho oo keliya manhaj la waafajiyey oo loogu talagalay carruurta iskuulka ka horreeya, weli waxaa lagama maarmaan noqon doonta inaad buuxiso Qalabka Waafajinta Manhajka (Curricular Alignment Tool – CAT) ee manhajka aad u adeegsanayso ilmaha dhallaanka iyo socod-baradka.

Loogu talagalay Xanaanada Carruurta ee Qoyska:



Waxaad isticmaali kartaa Manhajka Hal-abuurka ee Xanaanada Carruurta ee Qoyska (Creative Curriculum for Family Child Care) — oo daboola kooxaha da'da dhallaanka, socod-baradka, iyo carruurta iskuulka ka horreeya — adigoon buuxin Qalabka Waafajinta Manhajka (Curricular Alignment Tool – CAT). Ama, waxaad isticmaali kartaa manhaj loogu talagalay Kooxda Da'da Dhallaanka iyo Socod-baradka iyo mid loogu talagalay Kooxda Da'da Iskuulka ka horreeya, si aad u daboosho kooxaha da'da ee aad daryeesho, ka dibna u buuxi CAT adigoo adeegsanaya manhajyadan.

Manhajyada Waafaqsan ee Dhameystiran

Manhajyada hoos ku qoran waxay waafaqsan yihiin dhammaan qaybaha Hagayaasha Barashada Hore ee Washington

<p>Kooxda Da'da Dhallaanka iyo Carruurta Yar Yar</p> <p>Kurrikulumka Hal-abuurka® ee Dhallaanka, Carruurta Yar Yar & Laba-jirrada Hawaii Habka Waxbarashada Hore (HELP)® 0–3 Sano Kurrikulumka HighScope® ee Dhallaanka & Carruurta Yar Yar</p>	<p>Kooxda Da'da Isku Dhafan (Daryeelka Carruurta ee Qoyska)</p> <p>Taxanaha Hore ee Xogta Asaasiga ah ee Xanaanada Carruurta (Core Knowledge® Preschool Sequence) Kurrikulumka Hal-abuurka ah ee Xanaanada Carruurta (Creative Curriculum® for Preschool) Geesta Xiisaha Leh (Curiosity Corner) DLM Express-ka Waxbarashada Carruurta Hore (DLM Early Childhood Express®) Hawaii Habka Waxbarashada Hore (HELP)® 3–6 Sano Kurrikulumka Xanaanada Carruurta ee HighScope® (HighScope® Preschool Curriculum) Furitaanka Adduunka Waxbarashada (OWL) (Opening the World of Learning (OWL)) Maalinta Weyn ee PreK™ (Big Day for PreK™) Qalabka Maskaxda (Tools of the Mind)</p>
<p>Kooxda Da'da Isku Dhafan (Daryeelka Carruurta ee Qoyska)</p> <p>Manhajka Hal-abuurka ee Xanaanada Carruurta ee Qoyska</p>	

Tan iyo Waqtii Hore: Manhajka Waxbarashada Hore ee Madaxbannaanida Qabiilka

Marka lagu daro manhajyadan, fadlan ka fiirso inaad isticmaasho *Tan iyo Waqtii Hore*. *Tan iyo Waqtii Hore* waxaa loo sameeyay dhammaan ardayda yar yar ee ku nool gobolka Washington. Manhajkani waxa uu ka kooban yahay saddex cashar oo loogu talagalay ardayda yar yar inay ku bartaan fikradaha la xiriira madaxbannaanida qabiilka, taariikhda qabiilka deegaanka, iyo dabeeecadda.

Casharrada waxaa lagu sameeyay iskaashi ka dhexeeya Puget Sound Educational Service District (PSESD) iyo Thrive Washington. Qorshayaasha casharrada iyo agabka waa lacag la'aan waxaana laga heli karaa bogga **Qabiilooyinka Qaranka** ee Wasaaradda Carruurta, Dhallinyarada, iyo



Qoysaska (DCYF) ee: <https://www.dcyf.wa.gov/tribal-relations/since-time-immemorial>

Taageero Joogto ah oo loogu Talo Galay Doorashadaada Manhajka

Fadlan booqo

<https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/ea/CurriculumConsumerReport.pdf> si aad u akhrido Warbixinta Macaamiisha Manhajka ee Guulaystayaasha Hore oo dhammaystiran, taas oo ka kooban faahfaahin ku saabsan habka xulashada iyo shuruudaha loo adeegsaday manhajyada dhamaystiran.

Haddii manhajkaaga uusan ku jirin liiska, isticmaal warqadda shaqada ee Qalabka Isku-xidhka Manhajka (CAT) si aad u ogaato heerka uu manhajkaaga hadda la jaanqaadayo Hagayaasha Horumarka iyo Waxbarashada Hore ee Gobolka Washington.

